

Urka iyo Suunka

- Dumarka urka leh waa inay suunka ku xidhaan wixii calooshooda ka hoosaysa, ilaa misigta haday macquul yahay sidoo kalena dhanka sarena iskaga dhuujisaa.
- Suunka shafku waa in uu dhax maraa naasaha. Waa inaad jeeni qaarka adkaysaa.

Khaladaadka Guud ee Kuraasta Badbaadada Gaadhiga

- Ilmaha oo mudo ka horeysa mudadii munaasabka ahayd laga badalo kusiga badbaadada ee dib u jeeda oo loo badalo kuriga badbaadada hore u jeeda.
- Kursiga badbaadada oo aan si fiican loo adkayn markii la xidhayay—waa in aanu wax kabadan hal inch dhinacyada u wareegi karin ama kuriga ilaa uu kasoo kacsan yahay ilaa uu xanibo suunka.
- Dhiga ilmaha ku xidhan oo aan si fiican u adkayn — hadii aad jiidi karto xadhiga, markaa wuu dabacsan yahay.
- Xajiyaha oo kor loo qaado ama aad loo hoosaysiyo — waa in uu la sinaadaa kilinkilada ilmaha.
- Ilmaha oo kursi badbaado oo khadlan la saaro — waxbta suunka hakula deg degin ilmaha.
- Isticmaal xadhiga iyo suunka si aad sabiga ugu xidho, kursiga jiifka ama ka hore u jeeda, balse hawada isticmaalin.

Sharciga Suunka Kursiga ee New York

- Dhammaan rakaabku** waa inay xidhtaan suunka gaariga iyadoon loo eegin booska iyo da'da.

Sharciga Badbaadada Ilmaha Rakaabka ah iyo Kursiga Buusterka

- Ilmaha ka yar da'da 2 sano waa inay isticmaalaan Kursiga sii jeeda.**
- Dhamaan caruurta ilaa ay ka gaadhayaan dhalashadooda 8 jirka waa in si fiican loogu xidh xidhaa kursi badbaado.
- Waxaa lagu talinayaa in ilmaha loo dhigo kursi dherarkiisa ku haboon, halka da'diisa lagaga salaynayo.




Noofambar 2020

Badbaadada ilmaha Rakaabka ah

- Kuraasta badbaadadu waa inay waa inay tayadoodu noqotaa sida uu dhigayo sharciga heer Federal waana in loogu xidhaa si ay baajin ku karaan waxyeelada.
- Waxaad akhridaa tilmaamaha shirkada soo saartay lyo tilmaaha gaadhiga si aad u sugto inay in sidii haboonayd loo isticmaalay kursiga badbaadada oo uu sidii saxda ahayd ugu xidhan yahay gaadhiga.
- Si taxadir leh tilmaamahan u raac.
- Waxaad eegtaa tilmaamaha hagaha ee miisaanka, dherarka iyo xadidaada da'da kursi kasta.

HA DHIBSAN

ILMAHA BADANKOODU WAXAY SI
DHAQSA AH UGU GUDBAAN KURSIGA
XIGA EE GAARIGA AMA BUUSTARKA



NHTSA.gov/TheRightSeat



ad

1 Kursiga Sii jeeda



- Waxaa jira 3 nooc oo kuraasta gadaal u jeeda ah; kuraasta dhallaanka, kuraasta la badali karo iyo kuraasta dhimaystiran.
- Sharciga NYS wuxuu dhigayaa **in ilmaha kursiga sii jeeda la saaro ilaa da'diisu ka gaadhayo 2 sano.**
- Ilmuu kursiga sii jeeda muda intaa ka dheer ayaa lasii saari karaa hadii miisaankii loogu talo galay uu yahay.
- Markasta u xidh kursiga xaga danbe u jeeda barbar (xagal 45 digrii ah) iyo sida uu dhigayo tilmaamaha shirkadii gaadhiga samaysay.
- Si fiican u xidho suunka oo aan cidhiidhi ku galinaynin oo ku xidhi dhabarka ama hoostiisa.
- Kursiga dib u jeeda waa in la dhigaa kursiga danbe ee gaadhida. Hadii ay kharas tahay in kursiga la isticmaalaayi, waa in airbaga la bakhtiiyaa.
- Marnaba ha hordhigin kursi sii jeeda boorsada -hawada shaqaynaya.

2 Kursiga xaga hore u jeeda (ee xadhiga leh)



- Noocyada kuraasta xaga hore u jeeda ee xadhiga lehi way raaxo badan yihiin ama waa kuraas la isku geeyay.
- Tilmaamaha shirkada samaysay ka eeg meesha saxda ah ee lagu xidhayo.
- Ilamaха ka waynaaday kursiga xaga danbe u jeeda: Caruurta waa in lagu fadhiisiyaa kuraasta hore u jeeda ee xadhiga leh marka uu miisaankoodu dhaafo intii loogu talo galay (caadiyan 40-80 pounds, taas oo ku xidhan tilmaamaha shirkada kursiga gaadhiga samaysay).
- Dhig kursiga xaga hore u jeeda meal isku siman sida ku xusan tilmaamaha warshadeeyaha.
- Ku xidh xadhiga jeeni qaarka meesha saxda ah ee loogu talo galay ama garbaha oo adkee jeeni qaarka.

3 kursiga Buusterka



- Caruurta waa in lagu fadhiisiyaa kuraasta buusterka marka ay ka koraan kuraasta xaga hore u jeeda waana in lagu fadhiisiyaa kuraastan ilaa ay gaadhaan da'dii ay ku fadhiisan lahaayeen kuraasta dadka waawayn ee suumanka leh.
- Labada nooc ee kuraasta buusterka ee dhabar hooseeyaha iyo dhabar sareeyahaba waa in loo isticmaalaa suunka dhabta iyo garbaha.
- Suunka dhabta ee kuraasta buusterku waxa uu si fiican ugu marmaa misigta ilmaha sidoo kalena suunka garabku meeshii ku haboonayd.
- Kuraasta buusterka ee qaar waxay leeyihiiin dhabar sareeya qaarna lagumaba soo sameeyo dhabar.
- Kuraasta buusterka ee aan lahayn dhabarka waa in lagu xidhaa oo kaliyah gaadhiga leh madax tiirsii.

4 Suunka Dadka Waaweyn



- Ilmahaagu wuxuu gaadhay da'dii suunka dadka waawayn marka uu ku fadhiisan karo kursiga gaadhiga oo uu dhabarka ku qaban karo, oo jilbiisana uu soo laabi karo isagoon dhinacyada la dhacaynин.
- Suunku waa in maraa garabka (maaha qoorta), sidoo kalena suunka hoosena misigta (maaha caloosha). Tani caadiyan waa ilaa 4'9".